

**XEER L. 75 rep.**

**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA  
XOGHAYAHA GUUD**

MARKII UU ARKAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dhulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo siinayana fulin buuxda,

IYADA OO LA TIXGELINAAYO horumarinta beeraha oo muhimad gaar ah u leh dhaqaalaha Soomaaliya waxaa lagama maarmaan ah in la asaaso rug iyo khubaro ku takhasusaysa cilmiga beeraha farsamo ahaanna madax bannaan, si aad ahna ugu tababaran isla markaana la qalabeeyo, lana siiyo aqoon xirfadeed sida ugu dhameystiran ee suuragalka ah ee ka dhigaysa inay awoodaan aqoon yahannadu inay dadkooda ugu hagaan qaababka ugu wanaagsan ee la heli karo ee horumarinta beeraha.

IYADOO LA AQOONSADAY in si loogu helo qulqulka joogtada ah ee qaar ka mid ah qaybaha kala duwan ee degaanka, si loo helo codsiyo badan iyo firfircooni mug leh, iyo sidoo kale in uu saameeyn yeesho qaab dhismeedka dabeecadooda iyo waxbarashadooda akhlaaqeed iyo waxbarashadooda rayidka ah, waxaa lagama maarmaan ah in la siiyo dugsiga xirfadda beeraha ee ah dugsi la jiipto.

Waxa kale oo LA AQOONSADAY in diiwaangelinta iyo habeynta kulleejada laga hadlayo ay tahay inay ahaato bilaash ugu yaraan sanadiha ugu horreeya si loo fududeeyo gelitaanka ardayda qaar;

WAXAAN OGAADAY in si taxadar leh loo ilaaliyo diyaarinta arday kasta iyo waliba in loo fududeeyo shaqaalaynta ardayda ka soo bixi doonta shahaadooyinka kulliyada laftooda, waxaa lagu talinayaa in la xaddido tirada ardayda dowrad kasta.

WAXAA LOO TIXGALIYAY in dugsi xirfadeedka beeraha uu lahaado goobo tijaabooyin iyo laylisyo wax ku ool ah lagu sameeyo;

MARKUU DHAGEYSTAY Golaha dhexe dugsiyada;

MARKUU TIXGELIYAY isagoo uu u maqan yahay maamuluhu fasax dartii, oo howshiisa fulinayo xoghayaha guud iyadoo la raacayo macnaha qod.. 2 ee Xeerka 47 ee 22 luulyo 1950;

**WUXUU XEEREYAY**

**Qod. 1**

Dugsi saree ee xirfadda beeraha ayaa la asaasay, kaas oo lahaanaya magaca Hoyga xirfadlayda Beeraha, oo ula jeedaddiisu tahay soo saaridda xubno degaanka ah oo leh waxbarasho farsamo oo wanaagsan xagga beeraha.

**Qod. 2**

Hoyga waxa uu ka kooban yahay dugsi jiiif leh oo ku yaalla Ceel Muunye (Marka) iyo qaybta tijaabada iyo tababarka oo ku yaalla Jenaale.

**Qod. 3**

Hoyga Xirfadleyda Beeraha wuxuu qaadi karaa ugu badnaan 60 arday dhammaan saddexda dawro. Koorsada ma dowrka koowaad waxaa geli doona kuwa darajooyinka ugu sarreeya ee imtixaanada aqbalidda, iyo sida ku xusan qaababka lagu tilmaami doono qoraalka gaarka ah ee tartanka la soo saarayo sanad walba.

**Qod. 4**

Isku qorista iyo ku sugnaanta Hoyga dhammaan waa lacag

#### **Qod. 5**

Casharradu waxa ay ka koobnaan doonaan casharro caadi ah oo ka dhacaya Ceel Muunye, iyo tijaabooyinka iyo laylisyaduna waxa ay ka dhacayaan Jenaale.

#### **Qod. 6**

Dhamaadka sanad dugsiyeed kasta imtixaannada kor u qaadidda fasalka sare ayaa la qabtaa. Dhamaadka dowrada sedexaad ayaa imtixaanka wuxuu dhacayaa kadib imtixaanaadka khaaska ah ee lagu gaarayo ku guuleysiga diboloomada khabiir beereed.

#### **Qod. 7**

Maamulaha iyo macallimiinta Hoyga waxaa magacaabaya Maareeyaha markuu arko soo jeedinta Madaxa Xafiiska Waxbarashada Dadweynaha.

#### **Qod. 8**

Qaar ka mid ah kuwa qaatay deboloomada khabiir Beereed, waxa la siin dowraad takhasus ah sida: Tijaabada dalagga, naaxinta xoolaha iyo farsamada iyo makaanikada qalabka beeraha.

#### **Qod. 9**

Hoyga xirfadlayda beeraha waxa dowraadkeedu billaabnayaan sannad dugsiyeedka 1952-53.

#### **Qod. 10**

Maamul hoosaadka Hoyga xirfadlayda beeraha waxaa ku ansixinayo amar Maamulaha.

#### **Qod. 11**

Kharashaadka la xiriira shaqada Hoyga xirfadlayda Beeraha waxay koreysaa qodobka 67-aad sannad maaliyadeedkan iyo qodobka u dhigma sannad maaliyadeed xiga.

Muqdisho, 29 maajo 1952.

XOGHAYAHA GUUD  
**Canino**